SOMALI

Ku soo dhowaada shirkadda Boligbygg

Warbixin muhiim ah oo ku socota dadka guryahayaga deggan

Kirada guryaha BOGGA 16aad



Su´aalo iyo jawaabo BOGGA 13aad

Guurista, guri beddelka iyo guri sii kiraynta BOGGA 15aad

Dayactirka wixii aan ahayn gudaha guryaha – Boligbygg maxay ka mas´uul tahay? BOGGA 12aad

Ka badbaadista dabka BOGGA 5aad

Dayactirka guryaha gudahooda – adiga a ayaa ka mas´uula BOGGA 4aad

Ku soo dhowaada Boligbygg!

Buugyarahan waxaad ka helaysaa warbixin muhiim ah haddaad tahay qofka kiraysanaya guri kommuune. Waxaad leedahay xuquuqo, waxaana ku saaran waajibaad, xuquuqaha/waajibaadka ugu muhiimsan buugyarahan ayay si fudud ugu sharraxan yihiin.

Marka ay guryuhu dayactir/dibuhabayn u baahdaan, qayb adigaa ka mas´uula qaybna Shirkadda Boligbygg ee leh guryaha ayaa ka mas´uula. Faahfaahin dheeraada oo arrintan ku saabsan waxaad ka helaysaa kontaraaggaaga iyo sharciyada guryo kiraynta. Wixii su´aalo ah waxaad kala soo xiriiri kartaa xafiiskayaga.

Ammaanka guryahayagu aad ayay muhiim noogu tahay. Sidaa darteed waxaanu leenahay shaqaale ilaaliya oo la wici karo habeen iyo maalinba. Waxaa iyana muhiim ah in laga foojignaado dabka. Si joogto ah ayaa guryahayaga loo kontoroolaa in korontada cilladi ka jirto iyo in qalabka dab-digaha iyo qalabka dab-damiyahu ay shaqaynayaan. Shaqaalaha ka warhaya guryaha iyo waardiyayaashu waxay kaloo si joogto ah u kontoroolaan ammaanka meelaha dadka ka dhexeeya.

Waxaanu kaa codsanaynaa in aad dhowrto guriga inta aad deggan tahay, si fiicanna ula dhaqanto deriskaaga. Waxaanu rabnaa in dadka guryahayaga deggan dhammantood ay si fiican oo ammaan ah ugu noolaadadaan guryahayaga.

Salaan iga guddooma:
Jon Carlsen, maamulaha shirkadda Boligbygg

Tusmo

Yaad la xiriiraysaa? 3
Dayactirka gudaha: Adigaa ka mas´uula 4
Deriska iyo meelaha dadka ka dhexeeya 11
Dayactirka wixii guriga debedda ka ah:
Annagaa ka mas´uula 12
Su´aalo iyo jawaabo 13
Guurista, guri beddelka iyo guri sii kiraynta 15
Kirada guryaha 16
Caawimada kabista kirada 17
Meelaha aad la xiriiri karto 18

Yaad la xiriiraysaa?

Haddaad tahay qof hadda u soo guuraya guri kommune, waxaa hubaal ah in aad waxyaabo badan is wayddiinayso. Waxa fiican markaa in aad ogaato ciddii aad kala xiriiri lahayd kommuunka Oslo.

Degmada aad ka tirsan tahay

Degmo kasta oo Oslo ah waxaa ku yaal xafiis qaabilsan guryaha kaasoo go´aan ka gaara cidda heli karta guri kommune. Xafiiska guryaha ee degmada ayaa lagu xereeyaa codsiga lagu codanayo guryaha kommuuunaha, isla xafiiskaa ayaa go´aan ka gaara cidda la siinayo guri kommune. Xafiiska guruhu waxa kale oo uu kaa caawinayaa sida loo codsado lacagta kabista kirada iyo haddaad u baahato caawimo kaleba.

Taleefanka degmadaada waa 02180.

Boligbygg

Shirkadda Boligbygg Oslo KF ayaa iska leh guryaha kommuunka, iyadaa maamusha oo kiraysa. Annagaa ogaysiina degmada guryaha bannaanaada, qofkii guri kommune la siiyana anagaa kontaraagga la saxeexanna.

Xafiiskayaga

Xafiiskayagu wuxuu furan yahay maalmaha shaqada/waqtiyada shaqada. Xafiiskayaga waxaa la wayddiin karaa wax kasta oo ku saabsan guriga iyo kirada guriga.

Taleefanka xafiiskayagu waa 23 46 05 00.

Shaqaalaha ilaalada guryaha aad deggan tahay (Bomiljøvakt)

Waxaa la heli karaa marka ay timaaddo xaalad khatar ah, habeenkii iyo week-endhiyada.

Taleefanka shaqaalaha ilaalada guryaha waa 23 46 05 55.

Shaqaalaha ilaaladu waa waardiyeyaal waqtiyo joogto ah soo kormeera guryahayaga, ammaanka ayay sugaan waqtiyada habeenkii.

Waxaad wici kartaa shaqaalahayaga ilaalada haddii guriga wax khatari ka dhacaan waqtiyada uu xafiisku xiran yahay, tusaale ahaan marka biyo guriga ku furmaan ama deriska rabsho ka dhacdo.

Wixii faahfaahin dheeraada ka akhriso www.boligbygg.no

Johnér Bildebyrå /Susanne Kronholm

Dayactirka guriga gudihiisa: Adigaa ka mas´uula

Si wadajira ayaynu u wada ilaalinaynaa guriga aad deggantay iyo meelaha dadka ka dhexeeyaba. Sida caadiga ah waxay Boligbygg ka mas´uul tahay dayactirka wixii ka baxsan gurigaaga gudihiisa iyo maamulka guryaha, adiguna waxaad ka mas´uul tahay dayactirka wixii gurigaaga gudihiisa ah.

Marka lagu tusayo guriga aad soo degayso waxaa muhiim in aad isla markiiba sheegto wixii aanad ku qanacsanayn. Guriga waxaad ku qaadanaysaa xaaaladda uu ku sugan yahay marka aad degayso, marka aad ka baxaysana waa in uu ahaado xaaladdii uu ku sugnaa markaad soo degtay. Marka laga reebo gabowga caadiga ah ee isticmaalka iyo waqtigu keenaan. Inta aad deggantay guriga adigaa ka mas´uula ku dhaqanka kontaraagga iyo xeerarka nidaamka guryaha aad deggantay.

Xusuuso in aad dabdigahaaga baateriga ka beddesho.

Haddii uu gurigaaga leeyahay dabdige toos ugu xidhan xarunta dabdamiska waa in aanad adigu baateriyada ka beddelin.

Waxa ugu muhiimsan in aad ku dadaasho gurigaaga

Waxaanu rabnaa in aad guriga aad naga kiraysato dhowrtid oo ilaaliso inta aad deggan tahay, waana in aad guriga ka ilaalisaa in aan la jejebin, si khaladana aan loo isticmaalin. Halkan waxaanu ku soo qaadanay waxyaabaha aad si aada uga taxadaraysid.

Ka badbaadista dabka

Waxaanu si joogto ah uga shaqaynaa sidii aanu dab uga kici lahayn guryahayaga. Waana muhiim in adiga guriga deggani aad taa naga caawiso.

Waa in aad baateriyadu markay dhammaadaan ka beddeshaa dabdigaha, ugu yaraan hal mar sannadkii – waxaa fiican in aad beddesho 1da diisembar oo ah maalinta dabdigaha. Waana in aad si joogto ah u tijaabisaa in uu shaqaynayo, adigoo riixaya batoonka laga tijaabiyo.

Waxaa kale oo aad ka mas´uul tahay in aad sugto in qalabka dabka lagu damiyaa guriga yaal oo uu shaqaynayo. Qalabka dabka lagu damiyo saacadda ku dhegsan cirbaddeedu waa in ay tilmaamaysaa cagaarka, qalabka dabka lagu damiyo waa in aanay wax dhaawac ahi ka muuqan. Waa in ay ka muuqataa shaabadda tusaysa waqtigii la kontoroolay, sida caadiga ah waxa la kontoroolaa 5tii sanoba mar, waxaana la beddelaa 10kii sanoba mar. Adigu waad kontorooli kartaa qalabkan adigoo foororinaya 5-10 ilbiriqsi oo markaa dhegaysanaya in budada gudaha ugu jirtaa dhaqdhaqaaqayso, haddii markaa aad ka maqli waydo wax dhaqdhaqaaqa waa in aad iska beddeshaa.

Xafiiska Boligbygg ayaad ka soo qaadan kartaa ama ka beddelan kartaa dab-digaha iyo qalabka dabka lagu damiyaba, haddaad wax su´aala ka qabto sida qalabkan loo kontoroolo waad na soo wici kartaa.

Waxaa kale oo muhiim ah in dhammaan jidadka loogu talagalay in laga baxo haddii dab kaco iyo meelaha dadka ka dhexeeyaa ay bannaanaadaan/furnaadaan si looga baxo haddii dab kaco ama dadka la daadguraynayo. Sidaa darteed lama oggola in baaskeeladaha, kuraasta curyaamiinta, foognayaasha carruurta iyo qashinka la dhigo meelaha dadka ka dhexeeya.

Qalabka dabdigaha ee tooska ugu xidhan/ula shaqeeya xarunta dabdamiska

Guryaha qaar ayaa leh dabdigaha sida tooska ah ugu xidhan xarunta dabdamiska (eeg sawirka). Meelaha qalabkani ku xidhan yahay, dabdigayaasha guryaha ku dhejisan oo dhammi si taxan ayay isugu wada xidhan yihiin, Haddaad guryaha noocan ah deggan tahay waa in aanad dabdigaha gurigaaga meesha uu ku yaal ka fujin, haddaad meesha loogu talagalay ka fujiso waxaa dhici karta in dabdigahaagu ama dabdigayaasha guryaha kale aanay qaylin haddii dab kaco.

Haddii gurigaagu leeyahay qasabadaha biyaha soo daaya marka dabku kaco waa muhiim in aanad waxba sudhin ama wax ku garaacin. Haddii aad taa samayso waxaa dhici karta in biyo ka soo duulaan iyadoon wax dab ahi meesha ka kicin.

Cirbadda saacadda qalabka dabka lagu damiyaa waa in ay tilmaamaysaa cagaarka.

Qasabadaha biyaha soo daaya marka dab kaco waa in aanad wax sudhin waxna ku garaacin.

KA BADBAAD DABKA

Haddii dab kaco garaac taleefanka dabdamiska 110.

Haddi gurigaaga dab ka kaco

- Isku day in aad dabka ku damiso qalabka dabka lagu damiyo ee guriga kuu yaal.
- Dhammaan albaabada iyo daaqadaha xidh. Haddii ay noqoto in aad guriga ka baxdo albaabka guriga xidh si aanu dabku u gaadhin deriska.
- Haddii digsi shooladda kuu saaran uu holco, dabool saar ama buste dhogor(ull) ka samaysan dusha ka saar, ha isku dayin in aad biyo ku damiso.

Haddii guryaha deriskaaga dab ka kaco

- Ha dhex ordin qiiqa. Haddi qiiq ka buuxsamo luuqyada u dhexeeya guryaha, iskaga jir gurigaaga inta caawimo kaaga imanayso.
- Haddii luuqyada guryaha u dhexeeyaa ee la maraa aanay qiiq lahayn waa in aad baxdaa oo is badbaadisaa. Dadka dabka ku dhinta inta ugu badan waxaa dila qiiqa ka buuxsama meelaha la maro.

Meelaha sida lamafilaanka ah dabku uga bilaabmo

- **Cabbista sigaarka.** Mid ka mida sababaha ugu badan ee dabka dilaaga ahi ka bilaabmaa waa qofka oo sariirta sigaar ku cabba. Haddii aad sigaarka gudaha ku cabto, waxaa muhiima in aad isticmaashid aashteri wayn oo deggan.
- **Makiinadda cuntada.** Marnaba ha ka dul dhaqaaqin shooladda markaad cuntada karsanayso.
- **Shamacyada.** Marnaba shamac baxaya ha kaga tegin qol. Ha isticmaalin ulaha shamacyada la dhex geliyo iyo waxyaabaha sida fudud u guban kara ee guryaha lagu qurxisto.
- **Qalabka korontada ku shaqeeya.** Ka taxaddir mishiinnada yaryar ee korontada ku shaqeeya sida kafee mishiinka iyo biyo kululeeyaha, korontada ka saar markaad ku dhammaysato.
- **Qaybisooyinka.** Qaybisada godadka badan marka lagu isticmaalo qalab koronto oo badan way kululaataa, si fududna dab ayaa uga kici kara.



- **Mobil-dabeeyaha.** Dab ayaa ka dhalan kara mobiil dabeeyaha/jaarjarka, waa in aanu korontada ku jirin marka aanad isticmaalayn. Habeenkii oo dhan waa in aanu mobiilkaagu dabka ku jirin.
- **Nalalka.** Ha isticmaalin nalalka sida xad-dhaafka ah u ifa. Haddaad aragto dhalada nalka, daahyada ama qalabka kale ee guryaha la dhigto oo kulayl dartii madmadow ku samaysmay waxay ku tusaysaa in nalalkaagu si xad-dhaafa u kululaanayaan oo wax gubi karaan.

- **Dhar qallajinta.** Kulaliyaha korontada ku shaqeeye dharka ha ku dul qallajin
- **Filterka** marawaxadda jikada oo wasakhooba. Bishii waa in aad hal mar nadiifisaa filtarka marawaxadda jikada. Dufanka ku dhega marawaxadda marka aad cuntada karinayo si khatara ayuu u kicin karaa dab.

Daloolada hawadu waa in ay furnaadaan, Hawada cusubi adiga iyo gurigaagaba way idiin fiicantay.

Hawo siinta guriga

In guriga hawo cusubi soo gashaa waxay u fiican tahay naftaada - iyo gurigaba.

Hawada: Gurigaaga waxaa ku yaalla dalooIlo yaryar oo hawadu ka soo gasho kana baxdo. Waa in dalool-ladaasi furnaadaan, haddii kale madmadow aan caafimaadka u fiicnayn gurigana wax yeelaya ayaa derbiyada ku samaysmaya. Daldalooladaasi waxa kale oo ay ku yaallaan daaqadaha badankooda, jikada iyo qubayska. Waxa fiican in daaqadaha waxoogaa maalin kasta la furaa si hawo cusubi guriga u soo gasho. Xusuuso in aad marawaxadda jikada shiddo marka aad cuntada karsanayso.

Xusuusnow!
Haddii makiinaddaada cuntada korkeeda uu ku yaal qalabka naqaska jiida, waa in qalabkaasi marwalba fur-naadaa. Marawaxadda naqaska jiidda kuma xidhi kartid dhuumaha naqasku ka baxo ee guryaha ka dhexeeya, sababtoo ah guryaha kale ayay u gudbinaysaa naqaska ay adiga kaa qaaddo.

Isbed-beddelka hawada: In hawada gurigu aad isu bedbeddeshaa waxay waxyeeshaa guriga. Sidaa dar-teed waa in aanu guriga gudihiisu aad u qaboobaan. Waa in aanu heerkulka gurigu ka hoosayn 15 digrii. Taa macnaheedu waa in kulayliyeyaashu kuu shidnaa-daan marka debedda qabow ka jiro, xataa markaad guriga ka maqantay ama fasax u baxdo. Xataa xilliga qabowga waa in aad guriga hawada u furtaa, xaqiiqdii waxaa fudud in gurigu si fiican u diiro marka hawo cusubi soo gasho. Marka debedda qabow ka jiro waxa fiican in maalin walba dhowr daqiiqo guriga daaqa-daha loo wada furo si hawo cusubi u soo gasho.

Xusuuso in aad shiddo marawaxadda jikada markaad cuntada samaysanayso.

Kulayliyaha biyaha ku shaqeeya: Kulayliyayaashani si automatig ah ayay u shidmaan marka debeddu ay qabow noqoto. La xiriir Boligbygg hadddii uu kuu shidmi waayo ama aad ka maqasho dhawaaq dheeraada, waxa dhici karta in uu u baahan yahay in hawada laga sii daayo intaan la isticmaalin.

Nadaafadda

Dhulka iyo derbiyada iyo meelaha kale ee isku simani hore uma gaboobaan haddii si joogto ah loo nadiifiyo. Waxaanu ku faraynaa in aad si joogto ah guriga u huufarayso una dhaqdo, nadaafaddu waxay u fiican-tay guriga iyo ku noolaanta guriga.

Tusaalayn:

- Guriga haddaad si joogto ah u huufarayso uma baahnna dhaqis badan. Wixii wasakh qabqabsada waxaad kaga dhiqi kartaa maro yar oo qoyan.
- Qubayska waxaa lagu dhaqaa saabuun u khaasa oo si fiican wasakhda uga dhaqda.
- Marnaba biyo badan ha isticmaalin markaad guriga dhaqayso, waxaa kugu filan in aad isticmaasho maro yar oo qoyan.

Daloolada Bullaacadda qubayska iyo jikadu si fudud ayay u xirmaan marka ay ku ururRsamaan timaha, hadhaaga saabuunta, cuntada soo hadha iwm. Haddii ay daloolladaasi awdmaan waxaa dhici karta in guriga biyo qarqiyaan dhaawacna ku keenaan. Sidaa darteed waa in si joogto ah loo nadiifiyaa si aanay u awdmin (eeg sawirka). Waa in aad daloolladaa nadiifi-saa 4 jeer sannadkii. Waxaa kale oo muhiim ah in aan musqusha lagu ridin waxaan ahayn waraaqaha saxarada, haddii kale musqushu way xidhmaysaa.

Sidan ayaa loo nadiifiyaa daloolada bullaacadda ee qubayska:

- Galaafyo gasho gacmaha intaanad bilaabin.
- Ka qaad daboolka birta ah si aad gacanta u geliso.
- Gacanta geli daloolka oo ka soo ururi wasakhda sida timaha, haraaga saabuunta, oo ku rid qas-hinka.
- Haddii intaa kadib ay weli biyuhu dhaafi waayaan, ku shub dareeraha loogu talagalay in uu banneeyo, kabacdina biyo ka raaci, dareerahan waxaa lagu gadaa dukaamada cuntada.

Waa in aad isticmaashaa shay caara fiiqan oo aad daboolka kaga qaaddo daloolka bullaacadda, intaanad gacanta gelin markaad ka soo ururinayso timaha iyo wasakhda kale.

Haddii guriga meeli biyo sii daynayso ama meel kale ay xumaato si deddega ugu soo sheeg Boligbygg tale-efanka 23 46 05 00. Haddii xafiisku xiran yahay wac shaqaalaha ilaalada(bomiljøvakten) taleefanka 23 46 05 55. Xusuusnow waa in aanay qasabadda biyaha biyo ka tif-tiflayn. Haddii ay qasabadaha biyaha kaa xumaadaan la xiriir Boligbygg.

Biyaha ku dul daata kabadhka qasabadda jikadu ku samaysantay, ama miisaska kale amaba dhulka ee aan laga qalajin waxay keenaan dhaawac wayn, Biyaha meelahaa ku daata waa in isla markiiba laga qallajiyaa. Qubayska iyo hareeraha qasabadda jikada waa in markiiba biyaha laqa qallajiyaa.

Qashinka: Sannadihii u dambeeyay waxay Boligbygg bilowday hab fiican oo qashinka loo qubo, waxay keentay haamo cusub oo qashinka lagu qubo. Ku rid qashinka haamaha loogu tala galay, qashinka la dhigo meelaha dadka ka dhexeeya waxay keenaan ur qarmuun oo aan deriska iyo wada noolaasha u fiicnayn. Qahinkaasi waxaa kale oo uu soo jiitaa cayayaanka kala duwan. Sidaa darteed aad ayay muhiim u tahay in aad qashinka ku riddo haamaha loogu tala galay.

Xusuuso in qashinka aad kala saarto oo ku kala riddo bacaha buluugga iyo cagaarka ah sida ay inagu wargeliso shirkadda qashinku. Haddaad rabto in aad alaabooyin kale iska soo tuurto ha dhigin meelaha dadka ka dhexeeya iyo qolka qashinka ee adigu waa in aad iska soo tuurtaa.

Ka badbaad dhaawacyada

Daaqadaha: Meesha aad deggantay haddii aad ku aragto daaqaad jaban aad ama gurigaagaba daaqadi ka jebto sida ugu dhakhsaha badan u soo wargeli xafiiska boligbygg ama shaqaalalaha ilaalada(bomiljøvakten). Waxa taa la mida dhaawacyada kale ee aad gurigaaga ku aragto ee aan ahayn waxyaabaha uu gabowga gurigu ku keeno. Meeshii xumaata waa in la sameeyaa intaanay ka sii darin.

Xusuuso markaad weelka dhaqanayso waa in aad markiiba biyaha ka qallajiso miiska jikada. Haddii kale waxay dhaawac ku keenayaan miiska jikada iyo dhulkaba.

Gacmaha albaabada iyo kabadhada sida caadiga waxaa haya (ku dhuujisan) boolal. Boolalkaasi muddo kadib way debci karaan. Haddaad aragto boolal soo debcay waa in aad dismis/kaashawiito dib ugu adkaysaa, si aanay u soo dhicin.

Soo sheeg haddaad aragto cayayaan

Ma oggolin in cayayaan ku dhasho guryahayaga sabatoo ah guryaha ayay halleeyaan dadkuna ma jecla. Sidaa darteed waa in aad soo sheegtaa haddaad gurigaaga iyo qaybaha kale ee meesha aad deggantahayba ku aragto cayayaan sida (jiirka, baranbarada, cayayaanka yaryar ee derbiyada gala iwm). Lama oggola in shimbiraha cunto lagu siiyo agagaarka iyo gudaha guryaha aad deggantay sababtoo ah waxay soo jiitaan cayayaanka. Cayayaanka derbiyada gala aad ayay ugu fidaan meelaha kale (eeg xogta xaqiiqda cayayaankan) sidaa darteed aad ayay muhiim u tahay in aad markiiba soo sheegto. Waxaanu u dalbanaynaa shirkadda ciribtirka cayayaanka, si aan dib loogu arag meesha. Waa in aad guriga u soo daysaa shaqaalaha ciribtirka cayayaanka. Haddaad soo dayn waydo cayayaanku waxay markiiba ku faafayaan guryaha kale.

CAYAYAANKA DERBIYADA GALA



Cayayaanka derbiyada gala aad bay u yaryar yihiin, ka ugu wayni waa qiyaastii hal sentimetir badhkii.

- Cayayaankani waa mid aad u yar-yar (qiyaastii 6 mm) oo ku dhuunta guryaha.
- Cayayaankani sida caadiga ah wuxuu dhibaato sii kordhaysa ku hayaa magaalooyinka waawayn oo dhan.
- Haddaad cayayaankan guriga uga shakido waa in aad isla markiiba u soo sheegtaa Boligbygg. Cayayaanka waxa uun ciribtiri kara dadka takhasuska u leh, dhaqista iyo saabuuntu waxba kama taraan. Adigu nadiifi oo huufaree guriga intaad sugayso shaqaalaha ciribtirka cayayaanka.
- Calaamadaha lagu garto in cayayaankani guriga galay waxa ka mida haddii faamiligaaga kuwo isku arkaan qaniinyo cayayaan oo cuncun leh, haddaad koonayaasha derbiyada iyo rukumada sariiraha ku aragto dhibco madmadow (dhiig ama saxaro cayayaan) iyo adoo arka calaamado si cad u tusaysa in cayayaanku guriga ku jiro.
- Si aad uga taxadirto in cayayaankani guriga kuu galo iska ilaali in aad iibsato/qaadato saabaanka guryaha ee la soo isticmaalay sida sariiraha, furaashyada iyo kuraasta fadhiga. Markaad safar ka soo laabato waxaa fiican in aad shandadaha iska huufarayso dharkana ku dhaqdo 60 illaa 100 digrii ama qaljisada ku gurto/shiddo oo u dayso saacad illaa 2 saacadood.
- Boligbygg ayaa bixinaysa kharashka cirirbtirka cayayaankan, laakiin adigu waa in aad ku caawisaa sidii shaqada si fiican loogu qaban lahaa oo qashinka ka nadiifisaa alaabtaadana aad xidhxidhataa.

Deriska iyo meelaha lawada leeyahay

Si guryahayaga adiga iyo deriskaagu si fiican ugu wada noolaataan waxaanu samaynay xeerar nidaam oo dhammaan dadku u hoggaansamaan.

- Albaabada debedda waa in ay habeen iyo maalinba xidhnaadaan si aanay u soo gelin dadka aan meesha degganayni.
- Stoodhkaagu waa in uu qufullaadaa, qashinkana waa in aanad dhigin.
- Sanduuqa boosta iyo albaabadaba waa in magacaaga oo dhami ku qornaadaa.
- Maalmaha oo dhan inta u dhaxaysa saacadaha 23.00 illaa 07.00 waa in ay xasillooniyi ka jirtaa guryaha. Muusikada, raadyaha TV-ga iwm waa in aan la gaadhsiin heer ay dadka kale dhibsadaan.
- Muusik garaaca lama oggola axadaha/maalmaha fasaxa iyo maalmaha caadiga ah wixii ka dambeeya 19.00
- Martidaada adigaa si buuxda uga mas´uula.
- Adigaa ka mas´uul ah in martidaadu u hoggaansamaan xeerarka nidaamka guryaha.

Fiiro-gaara:
Ma rabtaa in aad wax fiican ka samaysid meesha aad deggantay? Haddii adiga iyo deriskaagu aad rabtaan in aad wax fiican ka samaysaan meesha aad deggan tihiin si iskaa-wax-u-qabso ah waxaad boligbygg ka codsan kartaan caawimo dhaqaale oo aad wax ku soo iibsataan sida dhir, carro, ubax, iwm.

- Haddii aad ka dacwoonayso derisk waa in dacwadaadu ahaataa qoraal, waxaana fiican in aad isticmaasho foomka xiriirka(kontaktskjemaet) ee laga helo bartayada internetka.

Dayactirka guriga debeddiisa: Annagaa ka mas´uula

Boligbygg waxay ka mas´uul tahay dayactirka meelaha dadka ka dhexeeya iyo guryaha dhinaca debedda xiga, qalabka teknikada sida wiishka iyo qalabka naqaska/hawada. Qalabka dabdigaha iyo in ay la socoto ciddii jebisa xeerarka nidaamka guryaha iyo kontaraagga guryaha.

Waxyaabahan waxaanu u samaynaa guryaha aanu si buuxda u leenahay:

- Waxaanu ka jarnaa cawska intaanu dheeraan.
- Waxaanu ka gurraa barafka, waxaanu quruurux ku daadinnaa meelaha lagu siiban karo, waxaanu dhignaa saxaarado quruurux ka buuxo guryaa hortooda si loogu daadiyo meelaha lagu siiban karo. Baabuurta barafka xaaqdaa waa soo daahi karaan marka barafka badani da´o.
- Waxaanu nalalka ka beddellaa meelaha dadka ka dhexeeya sida luuqyada guryaha hortooda, dabaqa hoosta(kjeller), qolka xagga sare(loft) iyo meelaha kale.
- Waxaanu hagaajinnaa albaabbada xirman/furman waaya iyo gambaleelka irridda hoose ee laga soo galo.
- Waxaanu hagaajinnaa daaqadaha ka jajaba meelaha dadka ka dhexeeya.
- Waxyaabaha derbiyada lagu qoro/sawiro ayaanu ka dhaqnaa.
- Qasaaladaha dadka ka dhexeeya ayaanu dayactirnaa.
- Asbuuciiba mar ayaanu jaranjarooyinka dhaqnaa.

Haddaad deggantay guryaha iskaashatooyinka ama kuwa lawada leeyahay(borretslag/sameie)

Haddii aad deggantay guryahan waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay waxaa ka mas´uula maamulka iskaashatada ama maamulka dadka guryaha leh. Adiga waa laguu sheegayaa nooca guriga aad degayso.

- Markaad kontaraagga saxeexayso waxaa la soconaya koobbi ah xeerarka nidaamka guryaha.
- Iskaashatada ama maamulka dadka guryaha leh ayaa ka mas´uula dayactirka iyo maaraynta meela dadka ka dhexeeya.
- Shaqaalaha ilaalada ee Boligbygg ayaa ka mas´uula ilaalada guryan maalin iyo habeenba.

Su´aalo iyo jawaabo

Ma rabtaa in aad wax ka beddesho gurigaaga?

- Haddii aad rabto in aad wax ka beddesho qubayska, sida haanta lagu qubaysto, waa in aad fasax nooga haysataa. Waa muhiim in dad xirfad u lihi ay hubiyaan in haanta qubaysku si fiican ugu dheggantay gidaarka iyo dhulkaba.
- Qasaaladda ma dhigi kartid meel aan ahayn qubayska ama jikada, waa in ay u dhan yihiin qalabkeeda oo dhan iyo meesha la dhigayaa, haddii qaybo kaa maqan yihiin waa in qof xirfad sharci u lihi kuu xiraa.
- Hadaad rabto in aad guriga rinjiyayso waa in qof xirfad u lihi rinjiyeeyaa. La xiriir xafiiska wixii warbixin dheeraada.

Haddaad rabto kanaalo-TV oo badan

- Badanka guryahayagu waxay leeyihiin kabel-TV. Haddii aad rabto internett ama kanaalo dheeraada, adigaa soo gashanaya.
- Baarabuulka qofkii rabaa wuxuu ku xiran karaa berendaha, laakiin laguma xiri karo berendayaasha laga baxo haddii dab kaco. Baarabuulku waa in uu wataa birihiisa lagu xidho. Baarabuulka laguma xidhi karo derbiyada guriga, waa dhaawici karaa derbiga ama waa soo dhici karaa oo dadka waxyeeli karaa. Haddaad baarabuul guriga ku xidhato adigaa bixinaya kharashka lagaga furayo hadhow iyo kharashka lagu hagaajin doono haddii uu guriga waxyeelo.
- Haddad deggantay guri iskaashato(borettslag) ama guryaha la wada leeyahay(sameie) waa in aad wayddiisaa maamulka in la oggol yahay baarabuul.

Haddii furayaashu kaa lumaan

- Haddii uu kaa lumo furaha albaabka hore ee guryaha laga soo galaa, la soo xiriir xafiiska, xataa haddaad deggantay guryaha iskaashatooyinka(borretslag) ama kuwa la wadaleeyahay(sameie).
- Haddii albaabka gurigaagu kaa xidhmo ama furayaashu kaa lumaan, adigaa dalbanaya qolada guryaha furta kharashkana la baxaya. Boligbygg ma haysato furayaal gurigaaga fura.

Talo siin:
Waxaanu dadka guryaha naga kiraysta kula talinnaa in furayaasha kuwa dheeraadk ah u dhiibtaan asxaabtooda ama deriska, si ay u isticmaalaan haddii kuwa ay isticmaalaan ka lumaan.

Haddaad rabto xayawaanka guryaha lagu haysto

Haddaad rabto in aad guriga ku haysato ey ama bisad ama xayawaan kale, waa in marka hore aad oggolaasho boligbygg wayddiisataa. Waxaad ka codsan kartaa foomka codsigs(kontaktskjemaet) ee bartayada internetka ama xafiiska. Haddaad deggantay guryaha iskaashatooyinka(borettslag) ama kuwa la wada leeyahay(sameie) ka eeg wixii la oggol yahay iyo waxaan la oggolayn xeerarka nidaamka guryaha.

Yaa bixinaya korontada?

Adiga ayaa bixinaya korontada gurigaaga. Magacaaga ayaad ku dalbanaysaa korontada markaad kontaraagga saxeexayso.

- Guryaha qaar kharashka kulaylinta guriga iyo biyaha kululi waxay ku jiraan kirada. Ka hubi kontaraaggaaga.
- Waa in aad adigu akhridaa saacadda korontada haddaad deggan tahay guryahayaga.
- Haddaad guurayso xilliga qabowga waa in aanad bakhtiin kulayliyayaasha inta lagu jiro waqtiga nowtiiska. Haddaad damiso kulayliyayaasha oo markaa qabowga dartii qasabaduhu dildillaacaan khasaaraha adigaa qaba.

Korontada oo dhawaaq bixisa – maxay noqon kartaa?

- Qalabka sheega haddii korontada guriga khalad ka jiro dhawaaq ayuu bixiyaa marka khalad ka jiro korontada.
- Qalabka korontada ku shaqeeya ee gurigaaga jeeggaree in ay fiican yihiin iyo in kale, si aad u ogaato in mid ka mid ahi cillad leeyahay bareesada mid-mid uga saar oo eeg in dhawaaqu joogsado.
- La xiriir Boligbygg haddi qalabkani dhawaaq bixiyo.
- Haddi aad maqasho dhawaaq dheer oo ah biib-biib oo aan kala joog lahayn waxa dhici kara in uu dabdigaha yahay. Markaa waa in aad sida ugu dhakhsaha badan dibedda ugu baxdaa.

La xiriir Boligbygg haddii khalad-digaha korontada uu dhawaaqo biib-biib.

Ma jiraan wax aanad ku qanacsanayn?

Waxaanu rabnaa in aad noo soo sheegto haddii aad guriga ama meelaha dadka ka dhexeeya wax khalad ah ku aragto, ama aad wax dhibaato ah kala kulanto ku noolaanshaha meesha iyo deriska. Foomka dacwada lagu qorto waxaad ka helaysaa xafiiskayaga iyo bartayada internetka. Waanad na soo wici kartaa.

!

Talo siin:
Waxaanu ku talinaynaa in dadka meesha deggani isutagaan oo samaystaan maamul ka shaqeeya sidii wanaag loogu wada noolaan lahaa.

!

Ma iska caymisay tuugada iyo khasaaraha?

Haddii dhib khasaare badan uu kugu dhaco waa nacasnimo in aad keligaa wax walba iska bixiso. Waxaanu kugula talinaynaa in aad alaabtaada guriga caymiso. Shirkad caymis ayaad kala xiriiri kartaa qiimaha caymiska

- Shirkadaha caymiska ee barayfidka ahi waxay bixiyaan wixii guriga kaaga gubta ama lagaa xado.
- Waxaa kale oo ay si kumeelgaadha u bixiyaan kharashka meeshaad ku noolaan lahayd marka gurigu kaa gubto.
- Haddii adigu aad leedahay khaladka dabku ka kacay, adiga ayaa wax walba oo gubta bixinaya ha ahooto hantidaada ama hantida boligbygg.

Guurista, guri beddelka iyo sii kiraynta guryaha

Ka guurista guriga kommuunaha

- Haddii aad rabto in aad guriga kommuunaha ka guurto waa in aad bixisaa 30 maalmood oo nowtiis ah, qoraal ahaan aad ugu geysaa Boligbygg.
- Haddi aydaan Boligbygg wax kale ku heshiin waa in aad guriga si fiican u nadiifisaa, waa inuu ahaadaa sidii maalintii aad soo degtay. Marka laga reebo gabowga caadi ugu dhici kara iyo waxyaalaha Boligbygg samayntooda ka mas´uulka tahay.
- Waa in aad si fiican meel walba guriga iyo istoodhkaba u dhaqdaa marka aad ka baxayso.
- Adigaa ka mas´uula samaynta wixii ka jajaba guriga.
- Haddaad guurayso xilliga qabowga waa in aanad damin kulayliyayaasha inta lagu jiro waqtiga nowtiiska, si aanay qasabaduhu qabow dartii u dildillaacin.
- Furayaasha oo dhan waa in loo celiyaa Boligbygg.

Codsiga guri beddelka

Degmada ayaa guryaha bixisa. Haddii aad rabto in guriga laguu beddelo waa in aad xafiiska guryaha ee degmadaada la xiriirtaa. Ogow guryaha kommuunku dadka kuma wada filla, sidaa darteed shuruudo adag ayaa ku xidhan in guriga laguu beddelo.

Codsi guri kala beddelasho

- Haddii aad soo hesho qof aad guriga ka beddelato waad ka beddelan kartaa, laakiin waa in degmadu soo oggolaataa.
- Foomka guri kala beddelashada waxaad ka helaysaa Boligbygg iyo degmada.
- Guryuhu way kala waynaan karaan, kiradooduna way kala duwanaan kartaa. Waxaad la wareegaysaa kontaraagga qofka kale oo ay ku qoran tahay kirada iyo muddada kontaraagga waxaad kaloo la wareegaysaa wixii waxyeello qofka kale guriga u gaystay.
- Waa in aad wargelisaa xafiiska diiwaangelinta dadka(Folkeregisteret) si caawimadaadii kiro kabka(bostøtten) guriga cusub laguugu soo wareejiyo.

Codsiga si sharciya usii kiraynta guriga

- Haddii aad codsanayso in aad muddo guriga cid kale ka sii kirayso muddo, waa in ay sababo muhiim ahi jiraan, Boligbyggna ay oggolaataa.
- Waqtiga ugu badan ee guri la sii kirayn karaa waa 2 sano.
- Waa in aad sheegtaa ciddaad ka sii kiraynayso iyo sababta.
- Guryaha u habaysan nooc iskaashatooyin(borettslag) ama kuwa la wadaleeyaha(sameie), waa in marka hore sii kiraynta ay oggolaadaan maamulkoodu intaanay Boligbygg oggolaasho bixin.
- Adiga ayaa wax walba ka mas´uula, sida in kirada la bixiyo iyo haddii gurigu wax noqdo inkasta oo aanad guriga degganayn. Jebinta xeerarka nidaamka guryaha waxay keentaa in guriga laydinka saaro.

Sii kiraynta guryaha ee aan sharciga ahayn

- Boligbygg haddii ay ka shakido sii kirayn oggolaasho la´aana, way kontorooli kartaa cidda deggan guriga.
- Lama oggola sii kiraynta sababo dhaqaale darteed.
- Boligbygg way kaala noqonaysaa guriga, maamulka degmadana way kuu sheegaysaa haddii ay ogaato in oggolaasho la´aan aad guriga sii kiraysay.

Stian Lysberg Solum / NTB Scanpix

Kirada

Bixinta kirada

- Kirada waxaa la bixiyaa 1da bisha, adiga ayaa ka mas´uula in kirada lagu bixiyo waqtigeeda.
- Lama oggolaado dib-u-dhigis bixinta kirada.
- Haddaad kirada la daahdo waxaa ku fuulaya ganaax iyo dulsaar.
- Haddii aad qaansheegta kirada heli waydo illaa 25ka bisha. La xiriir boligbygg intaan la gaadhin 1da bisha kale.
- Lacagta kiro kabista waxaad ka codsan kartaa degmada.
- Dhammaan dadka waxaanu ku boorinaynaa in ay isticmaalaan KID-lambarka, marka ay kirada bixinayaan.

U bixinta kirada si elektaroonik ah

Waxaad baankaaga la geli kartaa heshiis ah habka kirada loo bixiyo ee Avtalegiro iyo/ama eFfaktura. Haddaad doorato habka eFaktura waxaa nettbank-kaaga laguugu diyaarinayaa qaansheegtii kirada oo dhammaystiran, uma baahnid markaa in aad qorto koonto-lambarkaaga iyo labarka dheer ee KID-lambarka. E-Fakturada adigaa ka dalban kara nettbank-ka, Avtalegiro-dana waxaa kaa caawinaya baankaaga.

Xafiiskayaga soo wac wixii su´aalo ah ee ku saabsan bixinta kirada si elektaroonik ah.

Maxaa dhacaya haddaad kirada bixin waydo?

- Markay dhaafto 15-20 maalmood waqtiga bixinta, waxaad helaysaa warqad xusuusin ah oo ganaax la socdo. Haddii aad ku bixin waydo 3 asbuuc oo kalena waxaad naga helaysaa digniin. Haddii aanad weli ku bixin 3daa asbuuc waxaa qolada guryaha dadka ka saarta laga dalbanayaa in ay guriga kaa saaraan, sidaas baana guriga lagaaga tuuri karaa.
- Haddaadse bixiso waxa lagugu leeyahay oo dhan oo ay ku jiraan ganaaxii iyo dulsaarkiiba, bannaanka lagu dhigi maayo.
- Xafiiska NAV waxaad ka heli kartaa talobixin xagga dhaqaalahaaga ah. Sida ugu dhakhsaha badan ula xiriir haddii ay dhibaatadan oo kale kugu dhacdo.

Jaangoynta kirada

Kirada guryaha Oslo kommune waxaa lagu jaangooyaa sicirka suuqa iyo tayada guriga. Sidaa darteed sannad walba wax ka beddel ayaa lagu sameeyaa. Waa laguu sii sheegayaa intaan wax laga beddelin.

Lacagta kiro kabista

Oslo kommune iyo bankiga guryaha waxay kirada ka kabaan dadka dakhligoodu hooseeyo kiradooduna sarrayso.

Xafiiska NAV ayaa laga helaa warbixinta caawimooyinka kala duwan ee la heli karo. Kala xiriir talefoonka 02180.

Lacagta kiro kabista ee Kommunku bixiyo

- Lacagtan waxa keliya oo hela dadka deggan guryaha kommuunka.
- Foomka lagu codsado waxaa loo diraa degmeda.
- Degmada ayaa codsiga ka soo baaraandegaysa, su´aalahna ka jawaabta. Kala xiriir taleefanka 02180.

Lacagta kiro kabista ee dawladda dhexe bixiso

Warbixin arrintan ku saabsan waxaad ka helaysaa degmadaada iyo taleefanka adeegga warbixinaha ee bankiga guryaha 815 33 370 ama bogga internetka: www.husbanken.no

Qiimaynta guriga iyo kirada

Gurigaaga waxaa qiimayn ku sameeyay shirkad xirfad u leh. Qiimayntaa ayaa markaa lagu jaangooyaa kirada aad bixinayso. Haddii aanad ku raacsanayn waad ka dacwoon kartaa. Su´aalaha ku saabsan waqtiga dacwaddaada lagaaga soo jawaabayo, kharashka ku baxaya iyo waxay jawaabtu noqon karto waxaa lagala xiriiri karaa:

Xafiiska dhexdhexaadinta murannada ka dhasha kirada (Husleietvistutvalget) ee Oslo

Postboks 5118 Majorstuen
0302 Oslo
Tlf: 22 59 31 50
e-post: oslo@htu.no
www.htu.no

Maxakamadda Oslo (Oslo tingrett)

Postboks 8023 Dep
0030 Oslo
Tlf: 22 03 52 00



Meelaha aad la xiriiri karto

Xarunta Degamada Oslo (Oslo kommune sentralbord): Tlf: 02180.

Meelaha aad ka heli karto talobixino iyo warbixino:

Ururka guryo kiraystayaasha (Leieboerforeningen)

Ururkani wuxuu talo iyo caawimo siiyaa dadaka guryaha kiraysta.

C. J. Hambros plass 5
0164 Oslo
Tlf.: 24 14 91 00
Epost: lbf@lbf.no
www.lbf.no

Xafiiska badeecad iibsadayaasha (Forbrukerrådet)

Xafiiskani wuxuu caawiyaa qofka badeecad gata/guri kiraysta, waxay siiyaan talooyin iyo tusaalayn.

Postboks 463 Sentrum
0105 Oslo
Besøksadresse:
Skippergata 8–10
Sentralbord: 23 400 500
www.forbrukerradet.no

Caawimada ay bixiyaan ardayda qaanuunka barataa (Juss-Buss)

«Juss-Buss» waa caawimo qareen bilaash ah oo ay bixiyaan ardayda barata qaanuunka ee jaamacadda Oslo.

Arbins gate 7
0253 Oslo
Tlf: 22 84 29 00
www.jussbuss.no

Qareenada bilaashka ah ee Oslo kommunes (Fri Rettshjelp)

Caawimadani waxay u furantay dadka deggan Oslo ee u baahan caawimo qareen oo bilaash ah.

Storgata 19
Postboks 8809, Youngstorget,
0184 Oslo
Tlf.: 23 48 79 00
E-post: frirettshjelp@vel.oslo.kommune.no
www.oslo.kommune.no/bolig-og-sosiale-tjenester/fri-rettshjelp

Qareennada caawiya derbi-jiifka (Gatejuristen)

Ururka la yiraa Kirkens bymisjon waxay leeyihiin qareenno dadka balwadda leh/derbi-jiifka ah bilaash ku caawiya.

Rådhusgata 9, 0151 Oslo
Telefon 23 10 38 90
Epost:post@gatejuristen.no
www.bymisjon.no

Halka laga helo sharciyada oo dhan (Lovverket)

www.lovdata.no

Wixii su´aalaha ah kala
xiriir xafiiskayaga.

BOLIGBYGG

Ciwaanka nalagala soo xiiri karo
Telefoon: 23 46 05 00
Adresse: Wergelandsveien 3
E-post: postmottak@boligbygg.no
www.boligbygg.no

Waqtiyada aanu furannahay
Maalmaha shaqada: 09.00–15.00

Kala xiriir shaqaalaha ilaalada (bomiljøvakt) taleefanka: 23 46 05 55
wixii ka dambeeya waqtiga shaqada.